

Difaaca dabka

Guriga



Kalmar kommun
BRANDKÅREN

Difaaca dabka

Qalabka digniinta dabka



Qalabka digniinta dabku wuxuu kordhiyaa fursadda in bannaanka loo cararo haddii guriga dab qabsado. Qalabka digniinta dabka waxaa lagu rakibayaa saqafka qolka hurdada bannaankiisa ah. Haddii aad qolka hurdada gudhiisa ku cabbayso qalab elektaroonig ah oo uu ka mid yahay moobiilka, kolkaas waxaa habboon in qalab ka diga dabka uu ku dhegsan yahay saqafka qolka hurdada. Marka ay ugu yaraato waa in uu hal qalab oo dabka ka diga uu ku dhegsan yahay dabaq walba. Haddii gurigu ka weyn yahay 60 m² kolkaas waa in ay qalab badan oo dabka ka diga ku dhegsan yihiin. Adiga ayaa mas'uul ka ah in batteriga qalabka digniinta dabku uu shaqeynayo. Gurigaagu mal aha miyaa qalabka digniinta dabka? Kolkaas la xiriir cidda guriga leh si aad u hesho mid cusub.



Sidaan ayaad u tijaabineysaa qalabka digniinta dabka

Waxaad ku tijaabin kartaa adigoo riixa badhanka ku yaal dhammaan qalabka ka diga dabka. Riix oo hay ilaa laba ilbiriqsi (2 seken). Haddii uu dhawaaq bixin waayo, waxaad ku tijaabisaa battari cusub. Waa in aad caadeysataa inaad tijaabiso qalabka digniinta dabka, tusaale ahaan markaad safar ku maqnayd iyo marka uu bilowdo xilliga shumac-shididda ee ka horreeya ciidda masiixiga. Hana illaawin inaad marmar mariso huuferka.

Xusuusin inaad tijaabiso qalabka digniinta dabka

Si loo kordhiyo in qalab badan oo dabka ka diga ay shaqeeyaan waxay shabakada Ka hortagga dabka si joogto u dirtaa SMS dadka lagu xusuusinay in ay tijaabiyaan qalabka digniinta dabka. Haddii la galo bartaan internet www.skyddadigmotbrand.se waxaa badanaaba si fudud lagu qori karaa si SMS xusuusin ah loo helo.



Qalabka gacanta oo dab-damiska

Kooxda gurmada dabdamisku wuxuu kula talinayaa dhammaan dadweynaha in ay guryaha ku haystaan qalab dabka lagu damiyo oo ay ku jirto ugu yaraan 6 kg oo ah budo dabka lagu damiyo. Waxaa kaloo lagu talinayaa in qalabka gacanta oo ay ku jirto budo dabka lagu damiyo lagu haysto baabuurta, guryaha la jiido, doonyaha iyo wixii la mid ah. Qalabka gacanta ee dab-damiska waxaa laga iibsan karaa shirkadaha iibiya qalabka dabka, iyo dukaamada waaweyn ama dukaamada lagu iibiyo dhismaha.



Bustaha ama kubbeertada dabka lagu damiyo

Waa wanaagsan tahay in bustaha dab-damiska lagu haysto guriga. Waxaad bustahaasna u isticmaali kartaa inaad ku damiso dabka dharka qabsada ama dababka yaryar adigoo dusha kaga rogeysa.



Saacadda wakhtiga cunta-karinta iyo qalabka ilaaliya meesha cuntada lagu kariyo

Waa fududahay in la illaawo in la damiyo mishinka cuntada lagu kariyo, dabka badankiisna halkaas ayuu ka bilowdaa. Wax weel ama alaab ah ha uga tegin dusha mishinka cunta-karinta, mar walbana caado ka dhigo inaad kontaroomo in uu dansan yahay. Waxaa habboon inaad qalab saacad ku shaqeeya ku xirto si wakhti kadib korontada mishinka shidda isu damiso haddii aad horay u illowdey inaad damiso. Qalabka mishinka cunta-karinta ilaaliya wuxuu damiyaa mishinka cunta-karinta haddii uu kululaado. FIIRA GAAR AH! Qalabka ilaalinta mishinka waxaa halkaas ku xira shirkadda guriga leh.

Foto:
Johan Eklund

Sidaan ayaad u isticmaaleysaa qalabka gacanta oo dab-damiska

1. Fiyuuska ka saar



2. Dabka ku dhowee.
oo dabka aaddi.



3. Hoos u riix gacanqabsiga.



Aad uga taxadar ammaankaaga iyo kan deriska

Sannad walba dab qabsadaa 32 guri oo ku yaal dhulka uu ciidanka gurmada dab-damisku ka hawlgalo. Raac liiska hoos ku qoran si aad u hubiso difaaca dabka ee furigaaga. Haddaad qabto su'aalo ku saabsan difaaca dabka waxaa lagu soo dhoweynayaa inaad ciidanka gurmada dab-damiska kala xiriirto telefoonka 0480-45 75 10.

Ka hortag dabka

- Ku kaydso kabriidka ama tarraqa iyo qaraxadda meel aysan carruurtu gaarin.
- Marna ha shidin mishinka dharka lagu mayro, kan lagu qallajiyo, kan weelka lagu dhaqo ama wixii la mid ah haddii aadan guriga joogeyn ama seexaneyso.
- Dufanka iyo saliidda dab ayaa ka dhasha haddii kulaylku aad u sarreeyo. Marka aad wax dubeyso ama shiileyso soo dhoweyso daboolka digsigu si dab kaco aad ugu dabooشو. Marna ha u isticmaalin inaad biyo ku damiso!
- Dabku wuxuu badanaaba ka dhashaa cunto gubatay ama cunto iyadoo aan biyo lagu darin dabka la saaray. Si joogto ah u nadiifi filtarka marawaxadda jikada si aysan u yeelan wax dufan ah.
- Marna ha ka tegin shumac aad shidday adigoo aan agjoogeyn, kuwaa shiddayna dami. Birta shumaca la geliyo ha ku sharraxin waxyaalo dab ka dhalan karo. Waxyaalahaasna waxaa ka mid noqon kara meryo birta shumaca lagu qurxiyo, koofiyad ama wax la mid ah.
- Balkoonka ama daaradda ha dhigin alaab dab ka dhalan karo maadaama ay sababi karto dab lagu talagalay ama baaruud la soo gamay ay qalad ugu dhici karto.
- Ha isticmaalin qalab elektarooniga ah haddii xarigooda ama fiilada korontadu dillaacsan tahay ama kala go'an.
- Fiilada korontada siisa mishinka qaxwaha lagu kariyo, kan timaha lagu qallajiyo iyo la mid ah ka saar am siib korontada marka aadan isticmaalayn.
- Marnaba sigaarka ha ku cabbin sariirta ama meel kale oo khatar ugu jirto in aad ku gama'do.

Sii qorshey sidaad isu badbaadin lahayd

- Shuruudda hay'aduhu ku xirayaan guryaha ayaa ah in ugu yaraan hal qalabka digniinta dabku ku dhegsan yahay dabaq walba. Goor hore ka beddel battariga.
- Waxaa kaloo lagu la talinayaa inaad guriga ku haysato qalab dabka lagu damiyo sida qalabka ay jirto budada dab-damiska oo 6 kiilo ah
- Wax alaab ah ka dhigin jaranjarada iyo marinka irrirdda. Madaxa ku hay in meelahaasi ay yihiin meelihii aad ka baxi lahayd wax dhacaan.

Haddii dab kaco... 

Haddii dab kaco...

ISBADBAADI



... gurigaaga gudahiisa:

Isku day inaad dabka damiso. Haddii aadan damin karin, xir albaabka qolka dabku ka kacay oo isku day inaad guriga dibedda uga baxdo. Haddii qolka qiiq ka buuxsamay – ku gurguuro dhulka qiiqa hoostiisa ah oo badanaaba ay hawo nadiif ahi ka jirto. Haddii aysan suurtagal kuu ahayn inaad albaabka hore ka baxdo qiiq ama dab awgiis, kolka balkoonka ama daaradda u bax ama dariishadda fur oo caawimaad u qayli. Marka aad ka cararayso guriga dabku qabsaday marnaba ha raacin wiishka.

... gudaha guriga deriska:

Haddii jaranjarada guryaha u dhexeysa qiiq iska buuxiyo – dhexjoog gurigaaga ilaa inta ciidanka gurmada dab-damisku ka daminayo dabka ama wax kale kuu sheegayo. Ha xirnaado albaabka guriga dibedda looga baxo. Gurigu wuxuu noqon karaa difaac uusan qiiqa iyo dabku soo geli karin muddo 30 ilaa 60 daqiiqo ah. Inta wakhtigaas lagu gudajiro waxay ciidanka gurmada dab-damisku ku guuleysaneysaa in ay dabka damiso oo guriga kaa saarto.

U DIG



U dig dadka kale oo ag dhow si ay meel ammaan ah u galaan. Isku day inaad si deggan u dhaqanto. Xusuusnow in carruurta ay isku qararin karaan sariiraha hoostooda iyo armaajoyinka.

QAYLA-DHAAN DIR



Marka aad adiga iyo qoyskaaguba isku habsataan meel ammaan ah, qayla-dhaan dir addigoo wacaya lambarka qayla-dhaanka oo ah 112. Warbixin degdeg ah ka sii waxa dhacay, halkaad ka soo wacayso iyo qofka aad tahay.

DABKA DAMI



Markaas kadib ayaad isku dayi kartaa inaad adigu dabka damiso, laakiin khatar aan loo baahnayn ha qaadan! Budada wax lagu damiyo ku aaddi gunta dabka ee holaca ama dusha ha kala beegsan. Ha ku buufin agagaarka ama dusha filooyinka korontada. Haddii digsi gubanayo, dabka ku cabburi daboolka digsigu, laakiin marna ha ku shubin biyo! Haddii telefshanku gubanayo – ka saar fiilada korontada oo ku dami qalabka dab-damiska ama biyo dusha uga dhub.

Buuggaan yar waxaa soo saaray Xafiiska badbaada bulshada, waxaana tifaftiray Ciidanka gurmada dab-damiska Kalmar.

Kalmar Brandkär

Box 150, 391 21 Kalmar

Adareeska	Kaggensgatan 39
Telefoonka dhexe	0480-45 75 10
Fakis	0480-45 75 00
E-mail	raddning@kalmar.se
Bogga internet	www.kalmar.se/brand

